somali

MACLUUMAADKA KU SOCOTA WAALIDIINTA EE BARASHADA LUQADDA LABAAD EE FINNISH-KA (S2) DUGSIGA HOOSE-DHEXE

Barashada luqadda labaad ee Finnish-ka (S2, STK) waxaa loogu talagalay dhammaan ardayda guriga ku hadla luqadaha kale marka lagu daro Finnish-ka. Waxbarashadu waxay raacdaa manhajka qaranka, kaas oo ay qeexday degmada. Waxbarashada S2 maaha waxbarashada taageerada ah.

Waxaa jira qaybo badan oo kala duwan xagga aqoonta luqadda ah. Qaybaha ugu muhiimsan waxaa ka mid ah awoodda ku hadalka luqadda, awoodda akhrinta luqadda, awoodda qorista luqadda iyo awoodda fahamka dhegeysiga. Haddii darajada luqadda ardayga aysan u dhigmin qofka Finnish-ka dhaladka ah, caddadka waxbarashada ee S2 ayaa ardayga loo doorayaa.

Waxbarashada dugsiga hoose ah ee Turku arday kasta oo ku hadla luqado badan wuxuu xaq u leeyahay manhajka waxbarashada S2 haddii ay dani ku jirto. Calaamadaynta diiwangelinta dadweynuhu waa hage, laakiin sidoo kale xaaladaha la diiwangeliyay in luqadda hooyada ay tahay Finnish, ardaygu wuxuu heli karaa waxbarashada S2 haddii luqadda guriga ee dhabta ah ay tahay luqad kale.

Ardaygu waa inuu caddadka waxbarashada doortaa bilowga waxbarashada dugsiga hoose.

1. Haddii ardaygu uu ka wareego waxbarashada hore ee uu u wareego dugsiga hoose, caddadka waxbarashada ee luqadda Finnish-ka waxaa la dooranayaa iyadoo lala kaashanayo iskuulka barbaarinta iyo waalidka ilmaha. Waxbarashada hore ayaa talinaya caddad waxbarasho ee habboon iyo waalidka ayaa go'aanka leh. Barbaarinta hore ayaa aaladda Kielipeda u isticmaala in lagala socdo horumarka luqadda ardayga, iyo ujeeddaduna waxay tahay in si joogto ee habaysan loo isticmaalo Kielipeda. Waxbarashada hore ayaa u gudbinaysa dugsiga hoose macluumaadka ku socota luqadda ardayga.

2. Haddii arday ku hadla luqadaha badan uu ka yimaado meel ka baxsan babaarinta hore ama aan si kale loo xaqiijin karin aqoontiisa luqadda Finnish-ka, waxaa caddadka waxbarashada looga dhigayaa barashada luqadda labaad ee Finnish-ka. Macallimiinta waxay is baranayaan ardayga waxayna qiimaynayaan aqoontiisa luqadda Finnish-ka. Caddadka waxbarashada waxaa lagala hadlayaa waalidka inta lagu wada jiro xilli-dugsiyeedka hore. Iskuulka waxaa talo ka ah in ardayga uu helo waxbarashada S2 ama tan luqadda Finnish-ka ee caadiga ah iyadoo loo eegayo danta ardayga ee ku salaysan khibradda ardayga. Waalidka ayaa go'aan ka gaaraya caddadka waxbarashada.

3. Haddii ardaygu uu iskuulka yimaado bartanka waxbarashada aasaasiga ah, baahida caddadka waxbarashada ee S2 go’ankeeda waxaa gaadhaya iskuulka iyadoo ku salaysan qiimeynta baahida.

4. Haddii ardaygu ka wareego waxbarashada diyaarinta una wareego waxbarashada aasaasiga ah, caddadka waxbarashada ee S2 ayaa loo doorayaa.

Aqoonta luqadda ardayga mar walba wuu horumaraa. Caddadka waxbarashada waa la bedeli karaa haddii loo baahdo. Way wanaagsan tahay in doorashada caddadka waxbarashada uu yahay mid

somali

wakhti dheer socda, waana sababta ay go'aanka mar walba u tahay mid taxaddar leh. Waxaa laga wada hadli doonaa caddadka waxbarashada gaar ahaan bilowga waxbarashada aasaasiga ah, marka laga gudbo bilowga waxbarashada ee loo gudbo fasalka saddexaad iyo wakhtiga laga wareegayo dugsiga hoose ee loo wareegayo tan dhexe. Inta lagu jiro fasalka sagaalaad beddelka caddadka waxbarashada lama talinayo. Hadafka ayaa ah in ardaygu haysto caddad waxbarasho oo si fiican u taageeraya waxbarashadiisa.

Hadafka barashada luqadda labaad ee Finnish-ka ayaa ah in uu taageero korriinka luqadaha kale ee ilmaha iyo in uu taageero kobcinta aqoonta Finnish-ka ee ardayga. Barashada S2 waxay dhiirigelisaa isticmaalka luqadaha kale ee uu ardaygu ku hadlo wakhtiga uu baranayo Finnish-ka iyo maaddooyinka kale. Hadafka ayaa ah in laga caawiyo ardayga inuu gaaro aqoon luqadeed oo ku filan siduu maadooyinka kala duwan u barto. Waxbarashadu waxay siinaysaa ardayga qalabkii uu si joogto ah ugu kobcin lahaa aqoontiisa luqadda ee mustaqbalka. Barashada S2 waxaa lagu xoojinayaa ardayga sawirka wanaagsan ee nafsaddiisa waxaana laga caawiyaa inuu fahmo awoodihiisa iyo inuu u isticmaalo luqadda si geesinimo leh.

Markaa ardaygu kaligii noqon maayo oo kaligii lagu reebi maayo fasalka, laakiin wuxuu si gaar ah u helayaa taageere tii hore ka badan. Waxbarashada S2 waxay sii socotaa inta lagu jiro dugsiga hoose-dhexe, haddii ay jirto baahi loo qabo. Qabanqaabada si hawl yar ayaa loo beddeli karaa haddii loo baahdo. Hase ahaatee caddadka waxbarashada S2 faa'ido kaliya ayuu u yahay ardayga, sababtoo ah markaa macallimiintu waxay sidoo kale garanayaan qaabka looga caawiyo maaddooyinka kale. Ardayga sidoo kale waa la tixgelinayaa maadaama ay Finnish-ku ahayn luqadda ugu xooggan ee ardayga.

Waxaad sidoo kale ku baran kartaa luqadda labaad ee Finnish-ka dugsiga sare iyo dugsiga xirfadaha. Codsiga waxbarashada sare waxay sidoo kale suuragal ku tahay caddadka waxbarashada ee S2. Wasaaradda waxbarashada waxay talinaysaa in si siman loola dhaqmo dadka dalbanaya tacliinta sare. Hadafka ayaa ah in caddadka waxbarashada ee luqadda Finnish-ka aysan qiimo u ahayn qaadashada ardayda. Tusaale ahaan jaamacadaha Turku iyo Helsinki sidan ayay u shaqeeyaan.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa macallinka S2 iyo macallinkaaga khaaska ah.

12.4.2022